

# MACLUUMAADKAAGA. XUQUUQDAADA. WAAJIBAADKEENNA.

**Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan**  
ee quseeya hay'adaha HealthPartners ka tirsan.

Ogaysiisnaan waxa uu sharaxayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu taxluqa loo isticmaalayo iyo loo siidaynayo iyo sida aad adiga ku heli kartid macluumaadkaan fadlan si fiican u akhriso.

Fadlan si fiican u aqriso.

**Laga bilaabo Nofeembar 17, 2018**

## DULMARIDDA

Himiladeenna waxa ay tahay in la hormariyo caafimaadka iyo xaaladda lagu suganyahay ayadoo la kaashanayo xubnaheenna, bukaannadenna iyo jaalliyaddeena. Waxa aannu rabnaa in aad haysato taageerada daryeelka iyo si fiican ula socotid daryeelkaaga iyo caymiskaaga. Tan waxaa ka ku jira sharaxaadda sida loo isticmaalayo iyo loo maamulayo macluumaadkaaga, xuquuqdaada iyo dorashooyinkaaga ku aaddan macluumaadka.

Asturnaantu waa mowduuc ay adag tahay si lagu fahmo. Waxa aannu la soconnaa in lagu jaahwareeri karo, siiba marka ay meesha door ka qaadanaayan sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka. Waxa aannu qaddarinaynaa kalsoonida aad na siisay marka aad noo xilsaartay daawayntaada, daryeelkaaga, iyo caymiskaaga. Waxa aannu rajaynaynaa in dulmarkaan xuquuqdaada iyo doorashooyinkaaga, iyo waajibaadka naga saaran sida loo isticmaalayo iyo loo wadaagayo macluumaadkaaga, ay kugu caawiso sida aannu sharciga u dhawrayno iyo sida aannu kalsoonidaada u qaddarinayno.

## MACLUUMAADKAAGA

Ogaysiisnaan dhexdiisa, marka aannu isticmaalayno "macluumaadkaaga" waxa aannu ulajeednaa macluumaad adiga lagugu aqoonsanayo, in aad tahay xubin hadda ka tirsan ama ka tirsanaan jiray qorshaha caafimaadka, iyo ka hadlaya caafimaadkaaga ama xaaladdaada, adeegyada daryeelka caafimaadka, lacag-bixinnada, ama caymiska adeegyadaas ku baxaya. Waxaa ku jira macluumaadka kharashyada iyo caymiska, macluumaadka caafimaadka, sida jirrada ku haysa iyo adeegyada aad qaadatay. Waxaa ku jira macluumaadka shakhsiyeed sida magacaaga, cinwaankaaga, telefoonkaaga iyo taariikhda dhalashadaada. Waxaa ku jira macluumaad adiga kaa imaanaya ama ah natiijooyinka hawlaha aad nala wadaagtid, la wadaagtid shirkadaheenna ama kuwa kale, sida ku tiirsanaanta, oggolaashooyin hore, tixraacyo, go'amada caymiska, macluumaadka kharashyada iyo lacag-bixinnada.

Haddii aad ka tirsantahay qorshe aad iska caymiska shaqaaleeyahaaga, macluumaadka badankood ee ku taxluqa dhacdooyinka asturan ee qorshaaga caafimaadka waxa ay kugu soo gaarayaan oo ay soo marayaan shaqaaleeyahaaga. Fadlan shaqaaleeyahaaga kala xariir si aad ku heshid macluumaadkaas. Adiga oo ah xubin is-caymiyay, ogaysiisnaan oo idil ma aha mid adiga saamayn kugu reebaya. Laakiin qorshahaaga is-caymiyaynta haddii uu yahay mid ay maamusho HealthPartners Administrators, Inc., qaybaha qaarkood ee ogaysiisnaan waxa ay saamaynayaan sida qorshahaaga ay u maamusho HealthPartners – qaasatan macluumaadka ku taxluqa:

- "Malcuumaadkaaga"
- Sida aannu u maamulayno iyo badbaadinayno macluumaadkaaga (hoosimaanaya "Waajibaadkeenna")
- Cilmi-baarista suuqa (hoosimaanaysa "Xulashadaada")
- "Si lagu maamulo qorshahaaga" (hoosimaanaya "Sideebaan caadi ahaan u isticmaalayna iyo ula wadaagna macluumaadkaaga?")

## XUQUUQDAADA KA TIRSANAANTA QORSHAHA CAAFIMAADKA

**Marka ay timaaddo macluumaadkaaga iyo asturnaanta, waxa aad leedahay xuquuq hoosimaanaya sharciga gobolka iyo federaalka.** Qaybtaan waxa ay sharaxaysaa iyaga xuquuqdooda. Na weydii waxa ayaga ku taxluqa waxaana ku sharaxi doonna nidaamka, ay ku jirto haddii aad u baahantahay in aad codsigaaga ka dhigtid qoraal.

## Waxa aad xaq u leedahay in aad:

### Heshid koobiga macluumaadkaaga oo ah eletronig ama warqad ahaan

- Na weydisan kartid in aad eegtid ama qaadatid macluumaadkaaga oo ah si eletronig ama warqad ahaan.
- Waxa aannu ku siin doonnaa koobiga ama dulmaridda macluumaadkaaga sida ugu dhaqsiiyo badan ee suurtagalka ah.
- Haddii ay jiraan xog aannu kula wadaagi karin ama xadayno helitaanka, waxa aannu kugu caawinaynaa in aad sababta fahamtid.

### Na weydiiso in aannu macluumaadkaaga saxno

- Waxa aad na weydiin kartaa in aannu macluumaadkaaga saxno haddii aad noo sheegtid sababta uu qalad u yahay ama uusan u dhammaystirnayn.
- Waxa aannu codsigaaga oran karnaa “maya”, balse waxa aannu kuu sheegi doonnaa sababta sida ugu dhaqsiiyo badan ee suurtagalka ah. Sidaa awgeed, waxa aad na weydiin kartaa in aannu koobiga qilaafkaaga (qaraar qoraal ah ee aad noo soo gudbisay) ku darno xogtaada.

### Na weydiiso in aannu xaddidno waxa aannu isticmaalno ama wadaagno

- Waxa aad na weydiisan kartaa in aannu isticmaalin ama wadaagin macluumaadkaaga. Markastaba waannu tixgelin doonnaa codsigaaga, balse waxaa dhici karta in aannu maya dhahno haddii taasi ay wax u dhimayso awoodda aannu adiga kugu siinayno daryeelka ama adeegyada, ama haddii aannu awoodi karin in aannu wax ka baddalno nidaamkeenna.

### Codsashada xog-waraysiyada qarsoodiga ah

- Waxa aad na weydiisan kartaa in aannu kula soo xariirno si qaas ah (tusaale, lambarka guriga ama xafiiska) ama aannu iimeyl kuugu soo dirno cinwaan kale.
- Dadaal badan ayaan samaynaynaa si aannu danahaaga u qancinno. Waannu ku qasbannanahay in aannu codsigaaga yeelno, haddii aad noo sheegtid in aad halis kaaga iimaayso haddii aannan sidaas yeelin.

### Lagu siiyo qoraal taxana ah ee magacayada cidda la siiyay macluumaadkaaga

- Waxa aad na weydiisan kartaa qoraal taxana ah (“diiwaangelinta”) xilliyada aannu macluumaadkaaga la wadaagnay hay’ado ama shakhsiyad aadan xariir la-lahayn, cidda aannu la wadaagnay, iyo sababta.
- Waxa aannu soo raacnaynaa waqtiyada idil ee aannu macluumaadkaaga cid kale la wadaagnay, laga reebo marka ay ku taxluqdo caafimaadkaaga, lacag-bixinnada hawlaha daawayntaada ama daryeelka caafimaadka, iyo mararka qaarkood ee kale ee aannu siidaynay macluumaadkaaga (sida marka aad naga codsatay in aannu la wadaagno iyo siidaynno waxa ku taxluqa wax aannu horey kuugu sii sheegnay).

### Lagu siiyo koobiga ogaysiiskaan

- Waxa aad codsan kartaa koobiga waraaqda ogaysiiskaan markasta ee aad doontid. Markiiba waa aannu ku siinaynaa.
- Ogaysiiskaan waxaa kale ee laga helaa **healthpartners.com**.

### Dacwad ka xarayso haddii Asturnaanta xuquuqdaada la jabiyay

- Waxa aad si toos ah nooga soo dacwoon kartaa haddii aad dareentay in asturnaanta xuquuqdaada la jabiyay adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku qoran bogga ugu dambeeya ee ogaysiiskaan.
- Waxaa kale ee aad dacwad kaga xaraysan kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka xafiiska Xuquuqda Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights). Ka raadso macluumaadka la xariiraka **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/**.
- Wax tallaabo liddi adiga kugu ah kuma kacanayo marka aad dacwad samaysid.

## DOORSHOYINKAAGA

**Xaaladaha qaarkood marka ay jiraan, waxa aad haysataa doorashooyin dheeraada ee ku taxluqa sida aannu u isticmaalayno iyo u wadaagayno macluumaadkaaga.** Haddii xaaladaha hoos ku sharaxan wax ka dopribidayso, noo sheeg. Noo sheeg waxa aad rabtid in aannu sameynno, waxa aannu raacaynaa tusmooyinkaaga annaga oo sharciga raacayno.

### Waxa aad noo sheegi kartaa in aannu:

- Macluumaadka la wadaagin qoyskaaga, saaxibbaddaada, ama dad kale ee ka qaybgalaya daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaaga.
- Kula soo xariirno si aad lacag ugu taageertid himiladeenna. Kula soo xariirno marka hawlaha aannu qabanno lacag u arruurineyno. (Waxa aannu weli macluumaadkaaga u isticmaali karaana cilmi-baaristeenna annaga oo markaa sharciga u marayno).
- Macluumaadka la wadaagno cilmi-baarisyada suuqyada ee aannu la shaqeyno balse aan qayb ka ahayn shirkadeenna. Haddii aad doonaysid in aad ka baxdid heshiiskaan, waxa aad foomka ka buuxsan kartaa **www.healthpartners.com/optout**, ama ka waci kartaa Adeegyada Rukunka (Member Services) **952-883-5000**, ama lambarka lacag-la’aanta ee ah **800-883-2177**, ama Khadka Laliska (TTY) ee ah **952-883-5127**. Waxaa weli si toosa kuula soo xariiri kara HealthPartners ama kaala shaqeyna sababo cilmi-baarista suuqa quseeya; ama kuwo kale, haddii nalagu amrayo in aannu sharciga raacno ama sababo awood siin awgood ku samayno sahamada ku qanacsanaanta rukunka ama tayada.

## Waa in aannu helo oggolaashahaaga oo qoraal ah kahor inta aan:

- Macluumaadkaaga la isticmaalin ama lala wadaagin marka lagu xayeyiinayo hay'ad kale qalabkeeda ama adeegyadeeda.
- Macluumaadkaaga la isticmaalin ama lala wadaagin marka lagu xayeyiinayo hay'ad kale qalabyadeeda ama adeegyadeeda, haddii hay'ad kale ay lacagu nagu siinayso in aannu hawshaa u qabanno ama haddii qalabkeeda ama adeegyada aysan ahayn kuwo caafimaadka ku lug leh.
- Macluumaadka ka iibiino ama ka kiryesanno hay'ad kale.

## WAAJIBAADKEENA

Waxa aannu ilaalinaynaa macluumaadkaaga sababtoo ah dhawrista asturnaantaada muhiim ayay noo tahay, iyo sababtoo ah sharciga sida ah.

- Waa in aannu waajibaadkeenna iyo dhacdooyinka asturan ee ogaysiisnaan lagu soo qoray.
- Waxaa shardi lagu ah in aannu ogaysiisnaan kuu soo bandhigno marka aad xubin noqotid iyo waxaa shardi lagu ah in aannu soo galinno shabakadda internetka ee laga galo **healthpartners.com**.
- Waxa aannu baddali karnaa ogaysiisnaan, baddalaadyadana ku hirgalinaynaa macluumaadka oo idil ee aannu adiga ka hayno. Haddii aannu baddalaadyo muuqda samaynno, waxa aannu ogaysiiska cusub soo galineynaa internetka adigana warqad ayaan boostada kuugu soo diraynaa.
- Sida ugu dhaqsiyo badan ayaan kuugu soo sheegeynaa haddii la jabiyo (isticmaalka iyo wadaagga aan la oggolayn) taaso asturnaanta macluumaadkaaga halis galineysa.
- Ma aannu isticmaali doonno ama wadaagi doonno macluumaadkaaga siyaabo ka duwan sida ogaysiisnaan lagu qoray, marka laga reebo in qoraal noogu sheegtid in aannu sidaa yeeli karno. Fikraddaada waa baddali kartaa marka aad doontid. Qoraal noogu so sheeg haddii aad fikraddaada baddalaysid.
- Marka uu sharciga sidaa nagu amrayo in aannu oggolashadaada oo qoraal ah helno kahor inta aannu isticmaalin ama wadaagin macluumaadkaaga, sidaa ayaannu yeeli doonaa.
- Ma aannu isticmaali doonno macluumaadka isir wadaaggaaga si aannu go'aan uga gaarno haddii aannu ku siin doonno caymiska iyo qiimaha caysmiikaas.
- Waxa aannu badbaadineynaa macluumaadkaaga. Waxa aannu u fasaxeynaa in ay shaqaalahaenna iyo kuwa kaleba in ay eegaan macluumaadkaaga, balse taasi ay ku koobaantahay oo keliya baahida loo qabo in macluumaadka lagu maamulo qorshaha caafimaadkaaga iyo nacfigaaga, la raaco shuruudaha uu sharciga awood ugu siinayo, ama haddii u sidaa sharcigu farayo. Waxa aannu haynaynaa badbaadada qalabka, eletronikada iyo maamuliida loo dhisay in lagu ilaaliyo macluumaadkaaga iyo laga hortago eegitaan aan la oggolayn.

## Caadi ahaan sideebaan u isticmaalnaa iyo u wadaagna macluumaadkaaga?

Caadi ahaan waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaagna macluumaadkaaga siyaabaha soo socda:

### Lagu daaweeyo (daawaynta)

Waxa aannu u isticmaalnaa iyo u wadaagna macluumaadkaaga si lagu daaweeyo, iyo kuu abuurto daryeel leh ammaan iyo waayo-aragnimo dheeraada.

*Tusaale: Dhakhtarkaaga waxa uu noo soo dirayaa macluumaadka cudurkaaga iyo qorshaha daawaynta si aannu markaasi kugu caawinno sida lagu healayo adeegyo dheeraad ah.*

Fadlan xasuuso in aannu u baahnayn oggolashahaaga si aannu macluumaadkaaga kuula wadaagno marka ay jirto xaalad degdeg ah haddii aadan adiga awoodin in oggolaasho bixiso sababo la xariira xaaladda aad ku sugantahay. Waxaa sii dheer, in hay'adaha ay quseyso ogaysiiskan aanay u baahnayn oggolaashahaaga si ay dhexdooda macluumaadkaaga u wadaagaan, inta ay taasi ku socoto ujeeddo la oggolaaday.

### Lagu bixiyo adeegyadaada (lacag-bixinta)

Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo wadaagi karnaa macluumaadkaaga si daryeelayaasha iyo kuwa kaleba loogu bixiyo kharashka daryeelka adiga lagu siinayo.

*Tusaale: Waxa aannu la xariiri karnaa daryeelayaashaaga si laysugu duwo nacfiyadaada iyo lagu xaqiyo mudnaanshaha iyo caymiska.*

### Si lagu maamulo hay'adeenna (hawlaha daryeelka caafimaadka)

Waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaagayna macluumaadkaaga si lagu hormariyo tayada daryeelkaaga iyo muddada joogitaankaaga, iyo si aannu ku maamulno hawalaheenna.

*Tusaale: Waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u siideynaynaa macluumaadkaaga si aannu kuugu sheegno waxa ku taxluqa nacfiyada, daawaynta kale ama qalabka iyo adeegyada caafimaadka la xariira.*

## Lagu maamulo qorshahaaga

Annaga oo ah qorshaha caafimaad ee bixisa adeegyada caymis buuxa leh oo ka socda qorshe urur caafimaad, ama ku caawinayna maamulidda nacfiyadaas kooxda iskaa-is-cayminta qorshaha caafimaadka, haddii la codsado, lala wadaago macluumaad kooban kafaalaqaadaha qorshaha caafimaadka ururkaaga, ujeedooyin la xaariira qorshaynta, marka shuruudaha asturnaanta la qanciyo.

*Tusaale: Waxa qorshe si buuxda u caymiyaysan quseeya, waxa aannu macluumaadka tirakoobka qaarkood la wadaagi karnaa shaqaaleyahaaga si lagu sharaxo inta ay tahay lacagta aannu ka qaadayno caymiska.*

Waxa aannu macluumaadkaaga la wadaagi karnaa shirkadaheenna (kuwaaso loo yaqaanno ururrada xiriirka nala leh) ee nagu caawiya sida aan u qaybinayno iyo u maamulayno qorshaheenna caafimaadka. Waxa aannu macluumaadkaaga la wadaagi karnaa shirkado naga mabadxannaan (xiriir nala lahayn) ee dhinacyada saddexaad ah kuwaaso qandaraas kula galno in ay noo qabtaan sancada ama adeegyada qaarkood. Caadi ahaan waxa aannu u naqaanna "shuraakada meherada." Shuraakada meherada waxa uu sharciga shardi uga dhigayaa in ay ilaaliyaan macluumaadkaaga isla sida aannu annaga u ilaalinno. Hawalaha qaarkood oo ay shuraakada meherada ay noo qabtaan waxaa ka mid ah adeegyada maamulidda kiisaska iyo hawlaha lacag bixinta qaarkood. Waxaa kaloo dhici karta in aad macluumaadkaaga gaarka ah la wadaagno dhinacyo saddexaad, ay kujiraan hay'adaha wax maamula, hay'adaha dawladda ama amniga, sida uu sharciga farayo ama amrayo.

## Sidee kale ayaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga?

Waxaa naloo oggolyahay ama shardi nala kaga dhigay in aannu macluumaadkaaga u wadaagno siyaabooyin kale ee la xariira caafimaadka guud iyo hawlaha sharciga. Waa in aannu qancinno shuruudaha sharciga horyaalla kahor inta aannan macluumaadkaaga kugula wadaagi ujeedooyinka.

### Sharciga la raaco

- Waxa aannu u isticmaalnaa ama la wadaagnaa macluumaadkaaga haddii sharciga federaalka ama sharciga gobolka uu sidaa farayo.

### Lagu caawiyo arrimaha caafimaadka guud iyo ammaanka

Waxa aannu ula wadaagnaa macluumaadkaaga hay'adaha sharciga guud iyo hay'ado kale ee loo fasaxay xaalado qaarkood sida:

- Kahortagga cudurdka
- Caawinta qalabka ama lagu bixiyay amar in la celiyo
- La soo sheego xasaasiyaadka ama fal-celiska qaadashada daawooyinka
- La soo sheego xadgudubka, dayaca, dagaalka guriga ama dembiyada rugaheenna daryeelka ka dhaca
- Laga hortago ama la yareeyo halista dhabta ah ee ka imaan karta qofka caafimaadkiisa ama ammaankiisa
- Lagu caawiyo nidaamka caafimaadka lagu kormeero, sida hantidhawrka ama baaritaannada
- La addeeco amarrada qaaska ee dawladda sida militariga, ammaanka qaranka, adeegyada badbaadada madaxweynaha iyo u siideynta rugaha asluubta

### Laga jawaabo codsiyada deeqaha unugyada iyo xibanaha jirka

- Lagu isticmaalo iyo lagu wadaago macluumaadkaaga si lagu caawiyo deeqda halbowlaha ama xibnaha jirka.

### Aannu la shaqeeyno baaraha caafimaadka ama agaasimaha duugta

- Aannu la wadaagno macluumaadkaaga dhakhtarka baara geerida waxa sababay, baaraha caafimaadka, ama agaasimaha duugta.

### La xalliyo shaqaalaha magdhawgiisa

- Waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaageynaa macluumaadkaaga dacwado u jeeda shaqaalahaaga magdhawgiisa.

### Laga jawaabo dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga

- Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo ula wadaagi karnaa macluumaadkaga tallaabooyin sharciga quseeya, ama laga jawaabayo amar maxkamadeed ama maamul, ama hawlo kale ee sharciga salka ku haya.
- Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo ula wadaagi karnaa saraakiisha adkaynta sharciga.

### Marka la haysto qoraalka oggolaashahaaga

- Haddii aannu doonayno in aannu u isticmaalno ama wadaagno macluumaadkaaga siyaabo aan lagu qorin ogaysiiskan, waxaa shrcdi nala kaga dhigay in aannu marka hore helno oggolaashahaaga oo qoraal ah.

## WAXA MACLUUMAADKA QUSEEYA, SU'AALAHA AMA CABASHOYINKA

Waxa aad heli kartaa macluumaad dheeraad ah ee qorshooyinkaaga caafimaadka iyo dhacdooyinka asturan quseeya adiga oo Xubnaha Rukunka ee HealthPartners (HealthPartners Member Services) ka waca **952-967-5000**, lambarka lacagla'aanta **800-883-2177** ama **952-883-5127** (TTY). Waxaa kale ee macluumaadka ka heli kartaa internetka ayadoo laga galo **healthpartners.com**. waxaa kale ee aad la xariiri kartaa HealthPartners Integrity iyo Compliance Hotline ka waca **1-866-444-3493**.

### Haddaba ma tahay bukaanka HealthPartners?

Fadlan nagala soo hadal rugtaada daryeelka caafimaadka haddii aad wax su'aalo ka qabtid waxa ku taxluqa sida aannu u bixinno daryeelkeenna caadooyinka asturan. Waxaa kale ee aad nagula soo xariir kartaa telefoonka:

HealthPartners Integrity iyo Compliance Hotline laga waco **1-866-444-3493**

## HAY'ADDEENNA

Ogaysiiskan quseeya ururradeenna iyo bixiyeyaasheenna oo idil\*:

- Amery Hospital & Clinics
- Capitol View Transitional Care Center
- Group Health Plan
- HealthPartners Administrators (oo ah maamulaha is-caymiyaynta qorshayaasha caafimaadka)
- HealthPartners Dental Group and Clinics (ay ku jiraan Three Rivers Dental Care iyo Three Rivers Orthodontics)
- HealthPartners Hospice and Palliative Care
- HealthPartners Insurance Company
- HealthPartners Medical Group and Clinics
- Hudson Hospital & Clinics
- Hutchinson Health
- Lakeview Hospital
- North Suburban Family Physicians
- Olivia Hospital & Clinics
- Park Nicollet Clinic
- Park Nicollet Health Care Products
- Park Nicollet Melrose Center
- Park Nicollet Methodist Hospital
- Regions Hospital
- RHSC
- Riverway Clinics
- TRIA Orthopaedic Centers and Clinics
- virtuwel®
- Westfields Hospital & Clinic
- Shaqaalaha caafimaadka ee adeegyada ka bixiya urur kasta ee taxanahaan ku qoran
- Barnaamijyada hawlaha iyo adeegyada gaarahaaneed ay bixiyaan urur kasta ee taxanahaan ku qoran
- Daryeelayaasha iyo qandaraasleyda ka qaybqaata arriminta daryeelka caafimaadka habaysan ee isbitaalladeenna.

Laga bilaabo 6/1/2022

\*Taxanahaan waxaa dhici karta in waqti ka waqti la baddalo, bacdamaa uu ururkeenna baddalmayo iyo korayo. Waxa aannu taxana casriyaysiin doonnaa ogaysiiska lagu soo dhejinayo shabakadda internetka **healthpartners.com**.

# Qoraalka kala Soocid/Takooid La'aanta ee Xubnaha Health Plan (Qorshaha Caafimaadka)

## Waajibaadkeena:

Waxaynu raacnaa sharciyada xuquuqda madaniga ee Federaalka. Annagu ma sameeyno takoor ku saleysan isir, midab, asal qaran, da', naafo ama jinsiga. Annagu ma u kala saarno dadka ama ma ula dhaqano si kala duuwan ee sababteedu tahay jinsi, midab, asal qaran, da', naafo ama jinsiga, oo ay ku jirto aqoonsiga jinsiga.

- Waxaynu caawinaa dadka naafada ah in ay nala soo xiriiraan. Caawinaadan waa lacag la'aan. Waxaana ka mid ah:
  - Turjumaano aqoon u leh luqadda gacmaha ee dadka dhagaha la'.
  - Macluumaad ku qoran qaabab kale, sida far waawayn, maqal ah iyo qaabab elektaroonik ah oo la heli karo.
- Waxaan bixinnaa adeegyo loogu talagalay dadka aanan ku hadlin Afka Ingiriisiga ama aan ku kalsoonayn ku hadalka Afka Ingiriiska. Adeegyadaa waa lacag la'aan. Waxaa ka mid ah:
  - Turjumaano aqoon leh.
  - Macluumaad lagu qorey luqaddo kale.

## Wixii Caawinaad Luqad ama Isgaarsiin ah:

Wac 1-800-883-2177 haddii aad u baahan tahay caawinaad luqad ama isgaarsiin kale. (TTY: 711)

## Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan siyaasadeena ah kala soocid/takooid la'aanta:

Kala xiriir Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga lambarka 1-844-363-8732 ama integrityandcompliance@healthpartners.com.

## Diiwaangelinta Cabasho:

Haddii aad aaminsan tahay in aanan ku siinin adeegyadaan ama aan ku takoorinay oo ay sababtuna tahay isir, midab, asal qaran, da', naafo ama jinsiga, waxaad diiwaangelin kartaa cabasho adigoo la xiriiraya Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga lambarka 1-844-363-8732, integrityandcompliance@healthpartners.com ama Civil Rights Coordinator, Office of Integrity and Compliance, MS 21103K, 8170 33rd Ave S., Bloomington, MN 55425.

Sidoo kale waxaad kari kartaa inaad ka diiwaangaliso cabasho xuquuqda madaniga U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights (Waxda Adeegyada Aadanaha iyo caafimaadka ee Maraykanka, Xafiiska Xuquuqda Madaniga) si elektaroonig ahaan adigoo u marayo Portal-ka Office for Civil Rights, ee aad ka heli karto <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama kaga heli karto boostada ama telefoonka meesha:

U.S. Department of Health and Human Services  
Room 509F, HHH Building  
200 Independence Avenue SW, Washington, DC 20201  
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)

|   |  |
|---|--|
| <p>Español (<i>Spanish</i>)<br/>ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p> | <p>ພາສາລາວ (<i>Laotian</i>)<br/>ໂປດຊາບ: ຖ້າວ່າ ທ່ານເວົ້າພາສາ ລາວ, ການບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາ, ໂດຍບໍ່ເສັຽຄ່າ, ແມ່ນມີພ້ອມໃຫ້ທ່ານ. ໂທ 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                   |
| <p>Hmoob (<i>Hmong</i>)<br/>LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, cov kev pab txog lus, muaj kev pab dawb rau koj. Hu rau 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                 | <p>Deutsch (<i>German</i>)<br/>ACHTUNG: Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos sprachliche Hilfsdienstleistungen zur Verfügung. Rufnummer: 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p> |
| <p>Tiếng Việt (<i>Vietnamese</i>)<br/>CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>          | <p>العربية (<i>Arabic</i>)<br/>ملحوظة: إذا كنت تتحدث اذكر اللغة، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل برقم 1-800-883-2177 (رقم هاتف الصم والبكم: 711)</p>              |
| <p>繁體中文 (<i>Chinese</i>)<br/>注意：如果您使用繁體中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  | <p>Français (<i>French</i>)<br/>ATTENTION: Si vous parlez français, des services d'aide linguistique vous sont proposés gratuitement. Appelez le 1-800-883-2177. (ATS: 711)</p>      |
| <p>Русский (<i>Russian</i>)<br/>ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русском языке, то вам доступны бесплатные услуги перевода. Звоните 1-800-883-2177. (телетайп: 711)</p>      | <p>한국어 (<i>Korean</i>)<br/>주의: 한국어를 사용하시는 경우, 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>   |



|  |   |
|--|---|
| <p>Af Soomaali (<i>Somali</i>)<br/>OGAYSIIS: Haddii aad ku hadasho afka soomaaliga, Waxaa kuu diyaar ah caawimaad xagga luqadda ah oo bilaash ah. Fadlan soo wac 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                        | <p>Tagalog (<i>Tagalog</i>)<br/>PAUNAWA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, maaari kang gumamit ng mga serbisyo ng tulong sa wika nang walang bayad. Tumawag sa 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                 |
| <p>Oromiffa (<i>Cushite [Oromo]</i>)<br/>XIYYEEFFANNA: Afaan dubbattu Oromiffa, tajaajila gargaarsa afaanii, kanfaltiidhaan ala, ni argama. Bilbilaa 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                                    | <p>Italiano (<i>Italian</i>)<br/>ATTENZIONE: In caso la lingua parlata sia l'italiano, sono disponibili servizi di assistenza linguistica gratuiti. Chiamare il numero 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>       |
| <p>አማርኛ (<i>Amharic</i>)<br/>ማስታወሻ: የሚናገሩት ቋንቋ አማርኛ ከሆነ የትርጉም እርዳታ ድርጅቶቻችን በነጻ ሊያገለግሉት ተዘጋጅተዋል። ወደ ሚከተለው ቁጥር ይደውሉ 1-800-883-2177. (መስማት ለተሳናቸው: 711)</p>   | <p>ภาษาไทย (<i>Thai</i>)<br/>เรียน: ถ้าคุณพูดภาษาไทยคุณสามารถใช้บริการช่วยเหลือทางภาษาได้ฟรี โทร 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>   |
| <p>unD (<i>Karen</i>)<br/>ဟ်သုဂ်ဟ်သး- နမ့ၢ်ကတိၤ ကညိ ကျိၣ်အယိၣ်, နမ့ၢ်န့ၢ် ကျိၣ်အတၢ်မၤစၢၤလၢ တလၢ်ဘျုးလၢ်စ့ၤ နီတမံၤဘျုးသ့န့ၢ်လီၤ. ကိး 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  | <p>ελληνικά (<i>Greek</i>)<br/>ΠΡΟΣΟΧΗ: Αν μιλάτε ελληνικά, στη διάθεσή σας βρίσκονται υπηρεσίες γλωσσικής υποστήριξης, οι οποίες παρέχονται δωρεάν. Καλέστε 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                 |
| <p>ខ្មែរ (<i>Mon-Khmer, Cambodian</i>)<br/>ប្រយ័ត្ន: បើសិនជាអ្នកនិយាយ ភាសាខ្មែរ, សេវាជំនួយផ្នែកភាសាដោយមិនគិតល្អល្អ គឺអាចមានសំរាប់បម្រើអ្នក។ ចូរ ទូរស័ព្ទ 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                                | <p>Diné Bizaad (<i>Navajo</i>)<br/>Díí baa akó nínízin: Díí saad bee yáníłti'go <b>Diné Bizaad</b>, saad bee áká'ánída'áwo'déé', t'áá jiik'eh, éí ná hóló, kojí' hódíílnih 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>   |
| <p>Deutsch (<i>Pennsylvanian Dutch</i>)<br/>Wann du Deutsch schwetzscht, kannscht du mitaus Koschte ebber gricke, ass dihr helft mit die englisch Schprooch. Ruf selli Nummer uff: Call 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p> | <p>Ikirundi (<i>Bantu – Kirundi</i>)<br/>ICITONDERWA: Nimba uvuga Ikirundi, uzohabwa serivisi zo gufasha mu ndimi, ku buntu. Woterefona 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                                      |
| <p>Polski (<i>Polish</i>)<br/>UWAGA: Jeżeli mówisz po polsku, możesz skorzystać z bezpłatnej pomocy językowej. Zadzwoń pod numer 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  | <p>Kiswahili (<i>Swahili</i>)<br/>KUMBUKA: Ikiwa unazungumza Kiswahili, unaweza kupata, huduma za lugha, bila malipo. Piga simu 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  |
| <p>हिंदी (<i>Hindi</i>)<br/>ध्यान दें: यदि आप हिंदी बोलते हैं तो आपके लिए मुफ्त में भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध हैं। 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  | <p>日本語 (<i>Japanese</i>)<br/>注意事項：日本語を話される場合、無料の言語支援をご利用いただけます。1-800-883-2177 (TTY: 711) まで、お電話にてご連絡ください。</p>   |
| <p>Shqip (<i>Albanian</i>)<br/>KUJDES: Nëse flitni shqip, për ju ka në dispozicion shërbime të asistencës gjuhësore, pa pagesë. Telefononi në 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>   | <p>नेपाली (<i>Nepali</i>)<br/>ध्यान दिनुहोस्: तपाईंले नेपाली बोल्नुहुन्छ भने तपाईंको निम्ति भाषा सहायता सेवाहरू निःशुल्क रूपमा उपलब्ध छ । फोन गर्नुहोस् 1-800-883-2177 (टिटिवाइ: 711)</p>                   |
| <p>Srpsko-hrvatski (<i>Serbo-Croatian</i>)<br/>OBAVJEŠTENJE: Ako govorite srpsko-hrvatski, usluge jezičke pomoći dostupne su vam besplatno. Nazovite 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>                                    | <p>Norsk (<i>Norwegian</i>)<br/>MERK: Hvis du snakker norsk, er gratis språkassistanstjenester tilgjengelige for deg. Ring 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>   |
| <p>ગુજરાતી (<i>Gujarati</i>)<br/>સુચના: જો તમે ગુજરાતી બોલતા હો, તો નિ:શુલ્ક ભાષા સહાય સેવાઓ તમારા માટે ઉપલબ્ધ છે. ફોન કરો 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  | <p>Adamawa (<i>Fulfulde, Sudanic</i>)<br/>MAANDO: To a waawi Adamawa, e woodi ballooji-ma to ekkitaaki wolde caahu. Noddu 1-800-883-2177. (TTY: 711)</p>  |
| <p>اُردُو (<i>Urdu</i>)<br/>خبردار: اگر آپ اردو بولتے ہیں، تو آپ کو زبان کی مدد کی خدمات مفت میں دستیاب ہیں۔ کال کریں 1-800-883-2177 (TTY: 711)</p>  | <p>Українська (<i>Ukrainian</i>)<br/>УВАГА! Якщо ви розмовляєте українською мовою, ви можете звернутися до безкоштовної служби мовної підтримки. Телефонуйте за номером 1-800-883-2177. (телетайп: 711)</p> |

